# Qiimeynta Sinaanta Diiwaangalinta Ardayda iyo Cawaaqibka Saamaynta Kala-duwanaanta: Soo-Gabagabeyntii Warbixinta Koowaad

La xisaabtanka, Cilmi baarista, iyo Qeybta Sinaanta / Accountability, Research, and Equity Division

November 2019

## Gogoldhiga

Xilligii xagaagga ee sanadkaan 2019, Guddiga waxbarashadu waxay u xilsaareen xafiiska La xisaabtanka, Cilmi baarista, iyo Sinnaanta (ARE) Qeybtaan si ay u sameeyaan Qiimaynta Sahamada xogg uruurinta iyo Sinnaanta Kala-duwanaanta (EDIA) si loo garto loona baaro sinnaan la'aanta ka jirta sharciyada, dhaqamada, iyo nidaamyada saameeya diiwaangalinta ardayga Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis. Xafiiskaan EDIA waxay eegeen heerka ay gaarsiisan tahay talaabooyinka sharciyada MPS iyo dhaqamada inay la jaan qaadayaan dadaallada taageerada diiwaangalinta ardayda si loo siiyo qoysaska xulashoyinka dugsiyada ay doortaan iyo in la joojiyo midad kala sooca iskuulada oo dhan. ARE waxay la shaqeeynayaan xafiiska howlgalinta iyo Xiriirka Dibedda (E&ER) si waxaadu u dhammeeyso meeleynta Ardayda ee EDIA.

Sahminta diiwaangalinta Ardayda ee EDIA waxaa lagu hagayaaa afar su'aalood oo qiimeynta muhiim u ah: 1) Ilaa heer intee la eg ayey sahanka qiimeynta Dugsiyada Dadweynaha minneapolis, lagu muujiyey ballanqaadyada sharciyada lagu joojinaayo go'doominta iyo doorashada qoyska, si ay ula jaan qaadaan habraaca meelaynta ee hadda jira? 2) Sidee baa loo go'aamiyaa tirada bulshada ee iskuulada? 3) Maxay yihiin arrimaha ama sababaha keenaaya codsiyada qoyska? iyo 4) Sidee baa ardayda loo meeleeyaa?

## Qaababka Guudmarka

### Qoysaska iyo Ardayda

Sahanka xogg uruurinta iyo wadahadalada kooxdu waxay baarayaan caqabadaha iyo waxyaabaha ay kala kulmaan qoysasku marka ay diiwaangalinayaan ardayda iyo nidaamyada dalbashada dugsiga.

- ✓ *Waxaa lala xiriiray 1,653 qoys oo ay u dhigtaan carruur midab leh iyo Hindi Mareykan ah iyo 1,897 qoys oo caddaan ah oo ay caruur u dhigato dugsiyada*

Baadhitaanka xogg uruurintaan ayaa loo sameeyay in lagu baaro waxa sababaaya codsiyada iskuulka.

- ✓ *Waxaa lala xiriiray 112 arday dhigata fasalka lixaad iyo arday dhigata fasalada sideedaad, iyo 50 arday oo dhigata fasalka sagaalaad iyo tobnaad.*

### Hogaamiyaasha Dugsiyadaiyo Shaqaalaha

Wadahadal kooxeedku wuxuu baarayaa hogaamiyaasha dugsiyada cawaaqib darada ay kala kulmaan geedi socodka habka meelaynta ardayda.

- ✓ *Waxaa lala xiriiray 73 hoggaamiye oo dugsiyada ah*

Baadhitaanada xogg uruurintaan ayaa lagu indho-indheynaaya sidii loo baari lahaa khibradaha iyo fikir soojeedinta lagu hagaajinayo meeleynta ardayda iyo nidaamka dalbashada.

- ✓ *Waxaa lala xiriiray 53 hoggaamiyeyaasha dugsiyada iyo 37 xubnood oo shaqaalaha dugsiga ah*
- ✓ *Waxaa lala xiriiray 75an oo macalinta high-five-ka, iyo 68eed macallimiinta fasalada sideedaad*
- ✓ *Waxaa lala xiriiray 49an xubninta shaqaalaha ee xiriiriyayaasha qoyska (family liaisons)*

### Hogaamiyaasha Degmada iyo Xubnaha Shaqaalaha

Wadahadal kooxeedku wuxuu baarayaa doorarka shaqaalaha degmada iyo waayo aragnimda taageeraaya isdiiwaangalinta ardayda iyo nidaamka codsashada dugsiga.

- ✓ *Waxaa lala xiriiray 7 ruux oo shaqaalaha degmada oo ka kala socda Xafiiska Howlgelinta iyo Xiriirka Dibadda, Waaxda Luuqado badan, waaxda Waxbarashada Gaarka ah iyo Wakiilka*

Wadahadallada kooxdu waxay baareen waaya-aragnimada iyo talo soo jeedinta lagu hagaajinayo meeleynta ardayda iyo nidaamka dalbashada.

- ✓ *Waxaa lala xiriiray shan xubin oo ka mid ah ku xigeenada Kormeerayaasha Guud*

### Xogta hada Jirta / Kedydka Diiwaanka

Xoggta hada jirta ee la falanqeeynaayo, waxaa ka mid ah

- ✓ ***Xoggta diwaangalinta Ardayda ee Sanadka dugsiyeedka 2017-2019***
- ✓ ***Xoggta Diiwaangelinta Ardaydasanad Dugsiyeedka 2017-2019***
- ✓ ***Liiska Iskuulada Lagu Aqoonsado halka jinsiyad (qoomiyad)***
- ✓ ***Xoggta Daraasadda Xuduudaha ee Sanad dugsiyeedka 2020***
- ✓ ***Qayb ka mid ah foomamka EDIA***

**Xalka Guud**: Nidaamka diiwaangalinta ardayga ee hada ka jira dugsiyada dadweynaha Minneapolis, marka lagu daro sharciyada iyo ku dhaqankooda, ma ahan mid taabo gala, mana ahan mid si joogto ah loo isticmaalo, mana taageero yoolalka degmada ee iskuxirka iskuulada mana siiyo qoysaska fursad macno leh oo uu ku dooran karo iskuulka uu rabo waalidku.

---

Natiijooyinka EDIA waxay u qeybsantaa saddex qaybood oo la xiriira diiwaangalinta ardayda: (1) Nidaamyada iyo Sharciyada, (2) Hababka iyo ku Dhaqankooda, iyo (3) Khibraddaha Qoyska.

## Nidaamyada iyo Sharciyada

Nidaamka diiwaangalinta ardayda ee hadda jira, ee u oggolaanaya qoysaska inay kaqaybqaataan nidaamka codsiga dugsiyada, waxay abuurtaa tartan aan ula kac ahayn oo ka dhex dhaca dugsiyada, ardayda ,iyo ilaha dhaqaalaha, istiraatiijiyadda is dhexgalka ee hadda jirta waxay ku yeelanaysaa saamaynta yareynaysa reebista jaaliyadaha dugsiga. Sidaas darteed, nidaamka hadda ka jira iskuulada, oo ay weheliso arrimo dibadeed, ayaa dugsiyada MPS inta badan go'doomiya oo siinin qoysaska oo dhan adeegyo isku mid ah oo waliba aan helin iskuullada daboolaya baahiyahooda. Si loo gaadho himilooyinka guud ee xulashada iyo go'doominta ee dugsiyada MPS, dugsiyada dadweynaha Minneapolis waxay u baahan yihiin inay isbeddelo ku sameeyaan sharciyada diiwaangalinta ardayda iyo inay si iskaashi leh ula shaqeyso xaaladaha si ay dib ugu qeexdo dadaallada is-dhexgalka.

## Hababka Dhaqan Galka Ah

Dadaalka degmada ee lagu horumarinayo nidaanka iyo howlaha waxaa loola jeedaa in labadoodaba lagu dhimo caqabadaha horyaal qoysaska loona abuuro nidaam guud oo hufan oo taageera qoysaska oo dhan. Xoggta ku saleysan macluumaadka laga soo uruuriyay daraasaddkeena, degmadu waxay u baahan tahay in ay hagaajiso labada hab dhaqamada diiwaangalinta ardayda iyo sharciyada xukuma diiwaangalinta ardayda, haddii kale, arrimaha nidaamka go'doomintu way sii socon doonaan hadii aan la joojin.

## Khibradaha Waayo Aragnimada Qoyska

Nidaamka diwaangalinta ardayga waa inay siiyaan qoysaska ikhtiyaar ay ku heli karaan nidaamka dalabaadka dugsiyada MPS ama ay codsadaan dugsiyo carruurtooda iyo inay siiyaan fursadaha waxbarasho ahaan adag iyo taageeraaya caruurtooda. Si kastaba ha ahaatee. Qoysaska qaarkood, waxay la kulmaan caqabado gaar ah sidii ay ku heli lahaayeen warbixinada hawshaan. Qoysas badan ayaa dareemaya inaysan haysan macluumaadka iyo taageerada shaqaalaha ee ay ugu baahan yihiin inay si buuxda u fahmaan sida ay MPS, nidaamka diiwaangalinta ardaydu u shaqeyso, ama inay si wax ku ool ah uga qeybgalaan nidaamka codsashada dugsiga. Tani waxay si gaar ah u xaqiijinaysaa qoysaska sida caadiyanka ah aysan Degmadu ugu adeegin, qoysaskaas oo ay ka midka yihiin kuwa hatsta caruur midab leh iyo ilamaha Hindida Mareykan ah oo u qalma dheefaha waxbarashadda (ee sidoo kale loo yaqaan qado bilaash ah ama mida qiimaha jaban), dadkaas oo ka qayb qaata nidaamka codsiga dugsigauu ka hooseeyo marka loo eego qoysaska haysta carruurta Caddaanka ah ee aan helin waxtarka waxbarashadda. Nidaamka hadda jira, siyaasadaha, howlaha, iyo waxqabadyada jira, ma aha in qoysaska fursadahaan oo kale heli karaan iskuullada ay u buuxiyaan inay u helaan baahida waxbarsho ee carruurtooda.

## Talo soo jeedinta Guddiga EDIA

Sida ku saleysan natiijooyinkaan, Guddiga EDIA wuxuu ku talinayaa in Dugsiyada dadweynaha minneapolis inay sameyso isbadal ballaaran oo dhanka qaabdhismeedka ah, iyo sidoo kale isbeddelo gaar ah oo sedexda dhinac ah: 1) La xisaabtanka & daah furnaanta, tusaale ahaan fududeynta codsiyada / diiwaangalinta / iyo inbadan oo dib loo eego sharciyada meeleynta; 2) Isgaarsiinta & Wacyi gelinta, oo ay ku jirto shaqaaleynta shaqaale badan iyo iskaashi lala yeesho ururada ku saleysan bulshada si ay si fiican qoysaska u taageeraaya nidaamka diiwaangalinta; iyo 3) Aqoonta Cimilada & Dhaqanka, tusaale ahaan hirgelinta dhaqamada soo dhoweynta dhaqameed ee dhismayaasha dugsiyada MPS iyo helitaanka jawaab celin ku saabsan adeegsiga dhaqannadaas qoysaska iyo ardayda. Liiska buuxa ee talooyinka guddiga EDIA waxaa lagu soo daray warbixinta kama dambeysta ah ee Meelaynta Ardayda ee EDIA.